# Glover – Isku Xirka Aqoonta Maxaliga ah iyo Tan Deegaanka ee Dhirta

Helen Pickering
Somaliland Biodiversity Foundation
Hargeysa
Somaliland
Julaay 2025

**Mahadnaq**

Waxan jeclaan lahaa in aan halkan uga mahadnaqo Axmed Ibraahin Cawaale, guddoomiyaha Somaliland Biodiversity Foundation iyo Faysal Jaamac Geelle, maamulaha xarunta Dhiroonka ee Jaamacadda Hargeysa taageeradii ay ku lahaayeen hawshan. Sidoo kale Mary Barkworth, oo 2015-tii aasaastay Somaliland Biodiversity Foundation oo iyadu mar kaste ah isha dhiirrigelinta. Mahadcelin aad u weyn waxa sidoo kale mudan Anne Marshall oo ka tirsan Magtabadda iyo Kaydka Royal Botanic Garden, Kew, oo naga caawisay helidda kaydka nuskhadaha asalka ah.

Waxa daabacay Clapham Junction Printers,
Waxa sidoo kale turjumay Absolute Translation LTD, London.

## Hordhac

Sanadihii 1940aadkii Major E.F. Peck ayaa ahaa Agaasimaha Adeegyada Beeraha iyo Caafimaadka Xoolaha ee Somaliland. Mudadii uu xilka hayay wuxuu ku safray dhammaan deegaannada Maxmiyadda wuxuuna aad u xiiseynaayay inuu qoro magacyada geedaha iyo siyaabaha loogu adeegsado cuntada iyo daawada. Xogta balaaran ee uu uruuriyay ayaa lagu kaydiyay sanduuqyada galalka waxaana loogu deeqay Waaxda Xoolaha ee Hargeisa markii uu ku laabtay England sanadkii 1952. Nasiib daro, si lamid ah waxyaabo kale oo badan, sanduuqyadaan ayaa gubtay intii lagu jiray dagaalkii sokeeye dhammaadkii 1980aadkii. Nasiib wanaag, Abdillah Arr, oo ahaa turjumaankii ugu waynaa ee Major Peck, ayaa soo jeediyay biloowgii sanadihii 1940-naadkii in liiska magacyada geedaha Soomaalida la qoro, kaasoo ahaa fikir uu aqbalay Phillip Glover.

Sanadkii 1947 Glover ayaa qoray liiska isku dhafan ee magacyada geedaha Soomaalida, kuwaas oo ay soo uruuriyeen tiro kamid ah saraakiishii guumeysiga, oo inta badan joogay Somaliland. Wuxuu liiskaan ku daray magacyada ay horay u daabaceen Chiovanda (1916 iyo 1932), Drake-Brockman (1912), Gillett (1941) iyo Révoil (1882). Daabacaada Glover ayaa la iskugu aadiyay alifbeetada magacyada Soomaaliga. Maadaama afka Soomaaliga si rasmi loo qoray sanadkii 1972 dhammaan magacyada ayaa loo hinkaadshay dhawaaq ahaan, ayagoo dadkii soo uruuriyay ay siinayeen wax ka badan hal hinkaad xarfo isku mid ah. Tan ayaa ka dhigtay wax aad u adag in la raadiyo magaca geed gaar ah. Waxaa intaas dheer, magacyo badan o sayniska la xiriira ayaa wax laga badelay 80 sano ee ugu danbaysay. Sanadkii 2022 waxaa la go'aamiyay in la abuuro kaydka xogta casriga ah ayadoo la adeegsanaayo liiskii uu daabacay Glover oo ay la socdaan magacyada Soomaaliga ee lagu qoray afarta mujalladoo ee ‘Flora of Somalia’ ee uu isku-habeeyey Mats Thulin (1993-2009), ayadoo dadka loo sahlaayo inay baaraan ayagoo adeegsanaaya magaca Soomaaliga ama magaca sayniska.

Liiskaan hubinta ayaa la iskugu aadiyay qaabka alifbeetada ee labada luuqadoodba Ingiriiska iyo Soomaaliga, ayagoo la qoraayo magaca sayniska ah ee hadda iyo qoraaga  (POWO 2024[1]), magaca Soomaaliga, magaca lasoo gaabiyay ee qofka soo helay magaca iyo magaca sayniseed ee uu qoray soo uruuriyuhu (marka uu ka duwan yahay magaca hadda jira). Dhammaadka liiska magacyada waxaa ku qoran liiska dheeraadka ah ee erayada laga soo uruuriyay waxyaabaha sida xayawaannada, cimilada iyo wixii lamid ah.

Waxaa la sheegay in marka qoraayaashii asalka ah ay aaminsanaayeen inay soo uruuriyeen waxyaabo cusub ay mararka qaar adeegsadeen magacyada ay dadku ugu yeereyeen waxyaabahaas. Mararka qaar, cilmi baarista mustaqbalka ayaa muujinaysay in geedka horay loogu qoray magac kale, tusaale ahaan: Chiovenda ayaa markii hore qoray magacyada waxyaabaha *Commiphora africana* var. *africana* una qoray *Commiphora* ***tubuk***. Marar kale, magaca dadka deegaanku ugu yeerayeen ayaa sidiisii loo daayay, tusaale ahaan: *Ziziphus* ***hamur***, *Rhynchosia* ***gansole*** iyo *Senegalia* ***ankokib***. Tusaaleyaal kale, magaca Laatiinka ee geed lasoo helay ayaa lagu dhaqan gashay magaca ay Soomaalidu ugu yeerayeen, tusaale ahaan *Nicotiana tabacum* waxaa loogu yeeraa **Tabaak** afka Soomaaliga.

Axmed Ibraahin Cawaale ayaa uruuriyay liiska gaaban ee casriga ah; asagoo ku daray magacyo badan oo Soomaali ah oo dheeraad ah uuna raaciyay magacooda cilmi ahaan loogu yeero ayna ku jiraan: geedaha kaxandhada, geedaha la soo waariday iyo kuwa quruxda, oo la uruuriyay intii lagu jiray 2022-2024, kuwaas oo la filaayo, inay aasaas u noqdaan qaasmuuska rasmiga ah ee magacyada afka Soomaaliga ee geedaha.

[1] [1] POWO (2024). Plants of the World Online. Facilitated by the Royal Botanic Gardens, Kew. Published on the Internet; https://powo.science.kew.org/. Accessed May 2024.

## Tixraacyada uu isticmaalay Glover


Chiovenda, E. (1916). *Le Collezioni Botaniche, 1.* R. Instituto di Studi Superiori, Pratici e di Perfezionamento on Firenze. Museo ed Erbario Coloniale.

Chiovenda, E. (1932). *Flora Somalia, II*. Modena R. Orto Botanico.

Drake-Brockman, R.E. (1912). *British Somaliland*. Hurst iyo Blackett, London.

Gillett, J.B. (1941). *Hab dhismeedka Geedaha Galbeedka Dhulka Soomaaliyeed ee Ingiriisku Haystay iyo Gobalka Harar ee Boqortooyadii Abyssinia.* Diiwaanka Xogta Balaaran, lambarka 2, Royal Botanic Gardens, Kew, London.

Glover, Phillip Earle. (1947). *Liiska Ku meel gaarka ah ee geedaha Deegaannada Soomaalida ee ay Guumeysteen Ingiriiska iyo Talyaaniga, nagaarka iyo daawo dhaqameedka: ayna ku jiraan deegaannada aan la guumeysan ilaa dhulka Abyssinia*. Crown Agents for the Colonies; 4 Milbank London SW1.

Révoil, G.E.J. (1882) *Faune et Flora des Pays Comalis (Afrique Oriental).* Challamel Ainé, Editeur, 5 Rue Jacob. Paris.

## Jaantusyada Kooban ee Taariikhda uruuriyaasha xogta

**Burton (Burt.)**
Safarkii koobaad ee dalmarkii Richard Burton ku yimid Afrika wuxuu ku tagay Zaylac oo ku taala cirifka waqooyi-galbeed ee Somaliland sanadkii 1854/5. Wuxuu joogay Saylac muddo dhawr asbuuc ah xili dayreedkii kahor inta uusan safarkiisii ugu sii gudbin Harar ee dalka Itoobiya kadibna uu ku laabtay xeebta Berbera. Safaradiisii ku xigay ee gudaha Afrika ayaa diirada lagu saaray raadinta isha uu ka soo burqado wabiga Niilka waxayna ku yaaleen inta badan wadamada Tanzania, Kenya iyo Uganda.

**Chiovenda (Chiov.)** 1871 – 1941
Emilio Chiovenda ayaa ka qali jebiyay Jaamacada Rome sanadkii 1898 asagoo bartay Cilmiga Khayraadka Dabiiciga ah. Sanadkii 1900 waxaa loo magacaabay maamulihii koobaad ee Madxafka xarunta dhiroonka guumaystaha oo ku yaala Rome, kaas oo la abuuray si loo ilaaliyo noocyada geedaha lagu soo celiyay dhulka Talyaaniga lagana keenay Waqooyi Bari Afrika. Sanadkii 1909 wuxuu aad ugu safray wadamada Eritrea iyo Itoobiya taas oo siisay awooda sheegashada masuuliyada geedaha laga keenay gobalkaas, ayadoo qaar badan oo geedaha kamid ah ay sidoo kale ka baxaan Somaliland, Soomaaliya iyo waqooyiga Kenya. Wuxuu ku qeexay 53 asallada cusub iyo ku dhawaad 1,300 qayb hoosaad oo cusub. Sanadkii 1915 xaranta ayaa laga raray Rome loona raray Florence.

**Collenette (Col.)**
Bishii Juun 1929 C.L. Collette, saynisyahanka cilmiga dhirta oo kasoo jeeda Kew, ayaa laga codsaday inuu raaco Gudiga Xuduudaha kuwaasoo oo kala xadaynaayay xadka u dhexeeya Bariga Somaliland iyo dhulka Soomaaliya ee Talyaanigu haystay, waxay dageen magaallada Buraan, oo ku taala Bariga Gobalka Sanaag. Inta lagu jiro mudadaan, wuxuu abuuray xog uruurin balaaran oo la xiriirta dhirta iyo xog yar laakiin muhiim ah oo ku saabsan baalaleeyda iyo cayayaanka kale. Wuxuu qoray magacyada maxaliga ah asagoo sheegay inay kala duwanaayeen ayagoo ku xirnaa qabiilka deegaanka oo kala ahaa labada qabiil ee ugu waawaynaa oo kala ahaa Daarood iyo Isaaq. Nasiib daro, xanuunka xun ee duumada ayaa soo gaabiyay safarkiisii. Liiska xogta uu soo uruuriyay ayaa lagu daabacay Maqaalka Kew ee lambar 8, sanadkii 1931.

**Drake-Brockman (Dr. Br.)** 1875-1952
Kadib markii ciidanka iskaga baxay sanadkii 1900 Ralph Evelyn Drake-Brockman jayaa ku biiray Xafiiska Arimaha Dibada asagoo ahaa sarkaalka caafimaadka wuxuuna ka shaqeynaayay Bariga Guumaysigii Ingiriiska ee Afrika sanadkii 1915. Wuxuu uruuriyay qaybaha geedaha ka baxa Somaliland intii u dhexaysay 1908 iyo 1910. Geedaha uu soo uruuriyay ayaa la dhigay madxaf-dhireedkii Ingiriiska.

**Flora of Somalia (FS)**
Afar qaybood, la daabacay into u dhaxaysa 1993 and 2009. Waxaa tafatiray Mats Thulin.

**Farquharson (Farq)**
Robert Alexander Farquharson waxaa loo magacaabay khabiirka macdanka dhulka ee dawlada Somaliland sanadkii 1923 markaas oo uu madax ka ahaa mashruucii ceelal qodista. Sanadkii 1924 wuxuu daabacay 'Warbixintii Koobaad ee ku Saabsan Macdanta iyo Khayraadka Dhulka ee British Somaliland, oo leh qariirad'. Wuxuu intaas kadib la wareegay waaxda beeraha, asagoo hawlgab noqday 1938.
Wuxuu helay OBE ee 1938.

**Gillett (Gill.)** 1911 - 1995
Markii Jan Bevington Gillett uu baraha ka ahaa Kings College Cambridge, waxaa laga codsaday inuu kamid noqdo sanadkii 1932 Gudiga Xuduudaha ee Galbeedka Soomaliland/Harar. Tan ayaa keentay daabacaada xog uruurinta beeraha gobalka. Wuxuu intaas kadib kasoo shaqeeyay Hindya intii lagu jiray Dagaalkii labaad ee Aduunka. Isla markii uu ku laabtayba England, Gillett ayaa loo magacaabay khabiirka dhirta ee Waaxda Beeraha ee Ciraaq, Isaga oo wax budan ku daray Dhirta Ciraaq. Sanadkii 1948 wuxuu ku laabtay UK asagoo ahaa Madaxa Sayniska ee Kew, halkaas oo uu ka shaqeeyay mashruuca Dhirta ee Dhulka Kaynta Bariga Afrika. Sanadkii 1952/53 Gillett ayaa ku biiray Gudiga Xuduudaha ee xadka Kenya-Itoobiya. Wuxuu intaas kadib ku nagaaday Kenya wuxuuna noqday Masdaxa xarunta dhirta laga bilaabo 1964-1971, asagoo kormeer ka ahaa u wareejinta barnaamijka Madxafyada Qaranka ee Kenya. Kadib markii uu hawlgab noqday wuxuu sii waday inuu baaris ku sameeyo *Commiphora*, asagoo inta badan ka baarayay Somaliland iyo Itoobiya.

**Glover (Glov.)** 1912 – 1978
Philip Earle Glover wuxuu ku dhashay Koonfur Afrika wuxuuna ka qaybgalay Witwatersrand University oo ku taala Johannesburg halkaas oo uu ka qaatay shahaadada DSc. Shaqadiisii koobaad waxay ahayd cilmi baarista Tsetse oo lagu qabtay Tabora, Tanzania 1937-39. Sanadkii 1939 ayaa loo magacaabay Madaxa Daaqa ee Somaliland. Sanadkii xigay asagoo kaashanaaya H.B. Gilliland, wuxuu xog uruurinnada beeraha ku sameeyay Somaliland, kahor inta uusan u guurin Kenya si rasmi ah ugu danbayna asagoo hawlgab ah ku laaban South Afrika. Glover ayaa daabacay warbixinno kala duwan oo ku saabsan noolaha kala duwan iyo geedaha ku yaala Somaliland.

**Hunt** 1906 -1986
Major John Antony Hunt OBE wuxuu ahaa khabiirka macdanta dhulka oo ka shaqeeya goobaha saliida laga qodo. Intii u dhexaysay 1936 iyo 1958 wuxuu ahaa Madaxa Adeegga Maamulka ee Guumaystaha ee Maxmiyadii Ingiriiska ee Somaliland taasoo intii lagu jiray wakhtigaas uu fuliyay xog uruurin kala duwan oo ku aadan Maxmiyadda. Tan waxaa ku jiray qiyaasaad ku aadan mujtamaca ku dhaqan Somaliland iyo Putland, ayadoo lagu saleynaayo qiyaasaadka qabiilka, iyo sidoo kale daraasaadka dhirta iyo xayanaanka. Natiijooyinkiisa ayaa lagu daabacay: Xog Uruurinta Guud ee Maxmiyadda Somaliland 1944-1950,  Hargeisa 1951.

**Milne** 1898 - 1942
Kadib dhamaystirka adeegga milatariga ee sanadkii 1919 Geoffrey Milne wuxuu qabtay shaqada Kaaliyaha Kimistariga Beeraha ee Aberdeen iyo kadib oo uu barre ka ahaa Kimistariga Beeraha ee Leeds University, halkaas oo uu horay uga qaatay shahaadada maasterta. Laga bilaabo 1928 -1942 wuxuu ahaa khabiirka kimistariga ciida ee Xarunta Cilmi Baarista Beeraha ee Bariga Afrika oo ku taalay Amani wadanka Tanzania, halkaas oo uu ku dhintay sanadkii 1942. Wuxuu soo uruuriyay tiro geedo yaryar ah, oo inta badan ahaa ubaxleeyda, asagoo kaashanaayay xaaskiisa bartamihii sanadihii 1930aadkii.
Daabacaadaha: Qariirada ciida ee xirfadaysan ee Bariga Afrika - qariirad. Crown Agents London 1936.

**Peck (Peck)** 1901 - 1971
Edward Finch Peck wuxuu ku koray England. Sanadkii 1920 ayay waalidiintiisu u guureen Canada, halkaas oo uu ku bartay dhakhtarka qaliinka xoolaha. Kadib markii uu qalinjebiyey wuxuu ku laabtay England asagoo ay la socoto xaaskiisa wuxuuna qaatay Shahaadada dibloomada ee Caafimaadka Xoolaha Kulaalaha uuna ka qaatay Edinburgh iyo Liverpool. Kadibna wuxuu ku biiray Xafiiska Guumeysiga. Wuxuu markii koobaad ka soo shaqeeyay Nigeria (1931-34). Wuxuu ahaa Agaasimaha Adeegyada Xoolaha ee Somaliland (1934 - 1953), asagoo laba jeer loo badelay Kenya (1940 - 1941) iyo Tanzania (1944 - 1949).

**Playfair (Plfr.)** 1828-1899
Robert Lambert Playfair wuxuu kasoo jeeday qoys caan ah oo Scotish ah oo xiriiro waawayn la leh India. Wuxuu ku dhashay waxna ku bartay Scotland, wuxuu ku biiray Ciidamka Madras asagoo jira 18 sano, asagoo ugu danbayn ciidanka iskaga tagay sanadkii 1867 asagoo haysta Darajada Kormeel. Sanadkii 1854 waxaa loo wareejiyay Cadan asagoo qayb ka ahaa ilaalinta nabadgalyada Gacanka Cadmeed iyo koonfurta Badda Cas. Wuxuu sameeyay

baaritaanno uu ku sameeyay magaalooyinka xeebaha ee Saylac, Berbera, Xeis iyo deegaanada ku xeeran. Intii uu joogay Cadan wuxuu ku beeray geedaha Soomaliya ka soo jeeda ee Dhirta udugga beertiisa (way bixi waayeen). Wuxuu aad u yaqaanay afka Carabiga wuxuuna intaas kadib muddo ku qaatay Masar, Suuriya, Zanzibar, Algeria iyo Tunisia**.** Wuxuu bartay cilmiga taariikhda, juquraafiyada, dabiicada dhulka, dhirta iyo xayawaanka ee wadamada uu ka shaqeynaayay. Wuxuu daabacay ayagoo ay la socdaan bugaag kale Taariikha Dhulka Carabta Felix Arabia ama Yemen sanadkii 1859.
Wuxuu darajada ciidanka boqortooyada qaatay 1886.

**Révoil (Rev.)** 1852 - 1894
Georges Emmanuel Joseph Révoil wuxuu ahaa dalmar/dhul baare Faransiis ah iyo sawir qaade maskax badan kaas oo kasoo shaqeeyay waqooyiga Soomaalia sanadihii 1880aadkii, markaas oo uu helay farshaxanadii Romanka. Sanadkii 1887 wuxuu guursaday naag Barazil u dhalatay wuxuuna noqday Qunsul ku xigeenka San Jose, Costa Rica. Waxyar kahor inta uusan dhiman wuxuu u guuray Brazil si uu ula noolaado qoyska xaaskiisa halkaas oo ku dhintay Beri-Beri.
Buugaagtiisa waxaa kamid ahaa: Voyages au cap Les Aromates (Afrique Oriental) 1880,
Dix Mois à la Côte Orientale d’Afrique: La Vallée Du Darror Et Le Cap Guardafui 1889.